# MASHRUUCA WADADA BADBAADADA RAINIER AVE S - WAJIGA 2AAD

**FACT SHEET**

## ASALKA MASHRUUCA

Rainier Ave S waa wadada halbowlaha ah ee kutaalo koonfur Seattle oo taageeraya adeegashada tafaariiqda ah, makhaayadaha, dugsiyada, meelaha gaariyada la dhigto, iyo xarumaha hawlaha. Dadka reer koonfur Seattle waxay ka yimideen geesaha caalamka oo dhan, iyagoo keneen dhaqamadooda u gaarka ah, afluuqado iyo cunto, iyo go'aano laisla wadaago si ay ugu guulaystaan guriyahooda cusub.

## MAXAAN UGA BEDDELNAY RAINIER AVE S DHEX COLUMBIA CITY IYO HILLMAN CITY?

In ka badan 10kii sano ee la soo dhaafay, waxaa jiray ku dhowaad 3,600 shillal oo ay ka dhaceen Wadada Rainier Ave S. Isku-Celcelis ahaan, waxaa jira **1 shil maalin kasta tasoo ay qaadataa 45 daqiiqo in lagu nadiifiyo.**

Rainier ayaa waxaa uu leeyahay kudhowaad labo jibaar tirada shilalka halkii mile marka la barbar dhigo Jidka Aurora Ave N iyo Lake City Way NE inkastoo ay qaadaan ku dhawaad laba jeer mugga gaariga.

Dadka intooda badan waxay gaariga ku kahaynaayeen 38 mph, halka xadka xawaaraha ku dhejisan uu ahaa 30 mph. Kordhinta Xawaaraha waxay ku sii daraysaa darnaanta shilalka waxayna ka yeelaysaa dadka gaari kahaynayaan inay ku adkaato aqoonsashada khatarta suurto gal ah; iyo dadka lugaynaya iyo baaskiilka waataan.




*Darasada cilmi baarista waxay tusinayaan dadka lugaynaya oo gaari ku ordaya xawaare oo ah 40 mph ku dhaca waxay leeyihiin filasho oo 90% ah inay dhimanayaan, halka kale kuwa ku dhaca gaari ku ku ordaya xawaare oo ah 20 mph waxay leeyihiin filasho 10% ah.*




*Compared with other principal arterial roadways in Seattle, Rainier has a per mile crash rate higher than streets that carry more than two times the traffic volume, making it a top candidate for street design modifications.*

## NATIIJOOYINKA WAJIGA 1AAD

2015 tii, waxaan bedelnay qaabka wadada Rainier Ave S inta u dhexeeysa wadada S Alaska St ilaa wadada S Kenny St ka kasoo bilaab leenka 4aad ilaa leenka 3 aad, iyadoo leen kasta jihada hal dhinac ujeedo iyo leen dhexda ah oo wareeg ah. Waxaan xadka xawaaraha ka yareynay 30 ilaa 25 mph.Ujeedada mashruuca waxay ahayd in la yareeyo xawaaraha iyo tirada iyo darnaanta shilalka

**LA XARIIR**
James Le, Maareeyaha Mashruuca
RainierAveS@Seattle.gov or (206) 684-3174

Seattle Department of Transportation

The Levy to MOVE SEATTLE

VISION ZERO SAFER STREETS FOR SEATTLE

si loo badbaadiyo nolosha, iyo in wadada Rainier Ave S laga dhigo wado firfircoon ugu weyn ee koonfur Seattle.

Hal sano ka dib marka aan samaynay isbeddeladaan, waxaan aragnay wadarta tirada shilalka hoos u dhacaday 15% iyo dhaawac ama dhimasho shilalka haliska 0 lagu soo wargeliyay xadka mashruuca. Guud ahaan Waxaa Xawaaraha hoos u dhacay 10%, iyo tirada dadka xawaaraha 10+ mph xadka xawaaraha sidoo kale hoos u dhacay 10%.

## MASHRUUCU WUXUU XUBNAHA BULSHADA KA HELAY JAWAAB-CELIN WANAAGSAN:

- *"Meesha waxaad ka dareemaysaa inay hadda aad amaan u tahay iyo aad raaxo u badan tahay inaad wareeg aad samaysid."*

-*"Hadda waa xasilloon tahay sida aan maqlo hoonka baabuur hal laba maalmood oo kasta ka dibma aan arkin wax gaari kaxayn oo qaldan."*

- *"Xaafadaheena ayay waxay dareemki hayaan inay aad isku xiran yihiin (ma qaybinin xawaaraha gaadiidka)."*

## WAJIGA 2AAD

Sannadkan waxaan qorsheyneynaa in aan kasii wadno shaqadeena noo wadada Rainier Ave S ka bilaab S Kenny St ilaa iyo S Henderson St. Kuwaan waa hadafyadeena ammaanka:

- Yaraynta isku-celceliska xawaaraha gaariga iyo dhacdooyinka xawaare gaari ku wadida
- Yaraynta tirada dhaawac halista ah ama shilalka dhimashada leh
- Hagaajinta isgoysyada
- Hagaajinta xawaaraha baska iyo isku halaynta




Mashruucan waxaa si isku dhow ula shaqayn doonaa dhowr mashaariic oo kale, oo ay ku jiraan: casriyaynta Jidka 7 ilaa iyo leenka RapidRide; hagaajinta ammaanka iyo wadooyinka ka bixitaanka ee jidka Rainier iyo Martin Luther King Jr; iyo wanaajinta amaanka ee ardayda kusugan wadada S Henderson St.

## INOO SHEEG WAXA AAD U MALAYNAYSO

Baro waxa badan oo ku saabsan mashruuca oo ka qayb qaado adigoo booqanaya HYPERLINK "http://www.seattle.gov/transportation/RainierAveS.htm" www.seattle.gov/transportation/RainierAveS.htm. Waxaad ka heli doontaa macluumaad iyo sahan keena onlaynka ah halka aad ka wadaagi kartaa jawaabcelinta.


**LA XARIIR**
James Le, Maareeyaha Mashruuca
RainierAveS@Seattle.gov or (206) 684-3174


Seattle Department of Transportation

The Levy to MOVE SEATTLE

VISION ZERØ SAFER STREETS FOR SEATTLE